

Maajo 10, 2024

Dhalinyaraha Aqoonta leh ee Fasalka 4aad ee Dugsiga hoose Austin ayaa ku Faraxsan Jidkiisa ku aadan Tartanka Erayada Hingaada Qaranka

Intii uu u diyaar garoobayay dugsiga, degmada, iyo tartamada hingaadda gobolka, ardayga fasalka afaraad Sarv Dharavane ee Dugsiga Hoose Austin, 10, wuxuu bartay hingaada boqolaal erayo, howl adag oo ugu dambeintii faa'ido u keentay. Dadaalkiisa guusha lahaa wuxuu ku guuleysiiy Ururka Macalimiinta Tartanka Hingaada ee Gobolka Sannadlaha 63aad ee Maars, taasoo ku jiray dhammaan safarada qarashka la bixiyay ee ku aadan National Harbor, Maryland, halkaasoo uu ku tartamayo Tartanka Erayada Hingaada Qaranka oo qaran loo baahiyay. Hordhacyada waxay bilaabanayaan Maajo 28. Haddii si fiican sameeyo, wuxuu ku tartamayaan gabagabada ee Maars 30.

Tartankii gobolka, Sarv wuxuu ka guuleystay 20 hingaadiyayaal kale ee ka socdo fasalada sadexaad illaa sideedaad, kuwaasoo ku kala duwan da'da 10 illaa 14. Wuxuu ku tilmaamay la yaab guushiisa.

"Waan ka badiyay qof walba," ayuu yiri. "Qofka kaalinta labaad galay wuxuu ahay arday fasalka sideedaad kaasoo ka qeybqaatay afar jeer kulanka gobolka, horayna u galay tartanka qaranka, oo dhameystiray kaalinta labaad."

Wadada guusha maysan sahlananeyn. Sarv ayaa sheegay inuu aad ugu dadaalay sidii uu ugu diyaar garoobi lahaa tartanka hingaada dugsigisa, isagoo ka baranayoo liis leh 450-erey oo dugsiga uu siiyay ka qeybqaatayaasha. Wuxuu sidoo kale bartay erayo badan oo ku jiro qaamuuska ee aanan liiska ku jirin. Wuxuu isticmaalay App-ka loo yaqaan Word Club oo ay ku qoran yihiin erayo uu bartay, kuwaasoo uu sheegay inay si buuxda u caawiyeen inta lagu jiray tartanka erayada hingaada ee degmada.

"Dhammaan erayada waxay ka yimaadeen liiskaas erayada [Word Club]," Sarv ayaa yiri.

Wuxuu ku guuleystay horyaalka Tartanka Hingaada Gobolka Georgia 2024 isagoo si sax ah u hingaadinayo erayga "dashiki." Waaladiintiisa, Shailesh Dharavane iyo Shilpa Tupe, ayaa ka caawiyay inuu isu diyaariyo tartanka, hooyadiis xattaa waxay geysay maktabada oo ay u xushay buuggaag uu aqriyo.

"[Sarv waa] mid caqli badan, shaki kuma jirto taas," waxaa yiri aabihiis, Shailesh Dharavane. "Laakiin hooyadiis ayaa sameysay qaadista culus si loo hubiyo inaan halkaan joogno."

"Aad ayaan ugu faanaa isaga," waxaa yiri Shilpa Tupe, kaasoo ugu yeerto wiilkeeda Encyclopedia. "Abidkeen uma maleyn inuu ka gaarayo qaranka isku daygiisa ugu horeeyay ee tartanka hingaada, laakiin waan ogeyn inuu sameynayo inta karaankiisa ah. Marnaba kama uusan hadlin

ku guuleysiga tartanka. Wuxuu marwalba dhahaa, 'Waxaan isku dayi doonaa karaankeyga oo heer walba ah,' oo waan ogeyn inuu sameyn doono."

Ardayda isku fasalka Sarv, macalimiinta, iyo maamulka Dugsiga hoose Austin ayaa u dabaaldegay Maajo 8, iyagoo u rajee�ay wanaag tartanka qaranka.

"Aad ayaan ugu faraxsannahay inuu ku socdo matalaada dugsiga, dugsiga degmada, iyo gobolka oo tartanka hingaada qaranka," waxaa yiri Avis Mooneyham maamulaha Dugsiga hoose Austin.

Wuxuu ku soo noqday aasaaska Sarv isaggoo u diyaar garoobayo tartanka hingaada qaranka isagoo dib u aqrinayo qaamuuska iyo buuggaagta kale. Wuxuu sidoo kale ku dhaqmayaan erey bixintiisa si ugu diyaar garoobo tartanka.

Wuxuu sheegay aqrinta inay muhiim u tahay ku guuleysiga tartanka hingaada iyo ku guuleysiga howlaha iyo danaha kale. Sarv wuxuu ku dhiirogeliya ardayda kale inay helaan buuggaag iyaga ay xiiseeyaan oo ay kobciyaan jaceylka waxbarashada, sahaminta, iyo ku raaxeysiga adoo wada rogayo bogggaga.

"Aqri buuggaagtaada, dhammaan buuggaagta," Sarv ayaa yiri. "Haddii aadan aqrinin buuggaagta, weligaa meel ma gaareysid."

Waxaan u rajeyneynaa wanaag Sarv iyo qoyskiisa iyagoo ka qeybqaadanayo Tartanka Erayada Hingaada Qaranka. Waan la socon doonaa oo waan ku farxeynaa.

XXX